



Ma dhacday in adiga ama qof kale loo geystey fal dembi ah?

Waxaad caawimaad iyo warbixino ka heleysaa xafiiska gargaarka dhibbanayaasha. Intaan ku dhegeysanno ayaan talo iyo warbixin kaa siineynnaa socodka arrimaha dacwadda iyo xuquuqda aad leedahay.

Xafiiska gargaarka dhibbanayaashu waa urur samafal oo caawimaad siiya dhibbanayaasha dembiyada, markhaantiyada iyo eheladooda. Lacag la'aan ayaanna dadka ku caawinnaa. Waana lagu caawinayaa iyadoo aan loo eegin dembiga lagu geystey ama aadan u baahan inaad la timaaddo inaad boliiska ka haysato warqad dacwad. Waxa aad noo sheegtana cid kale uma sheegeynno.

Xafiiska gargaarka dhibbanayaashu ma ahan hay'ad dowladeed, waana urur ka madaxbannaan siyaasad iyo diin. Waxaana nala shaqeeya boqolaal qof oo waxbarasho leh oo tabaruaad ahaan nala caawina dhibbanayaasha, dadka markhaantiga ah iyo qaraabada caawimaad naga soo doonta. Hawlaha aan qabannaana waxay ku salaysan yihiin xuquuqda aadanaha.

Gargaarka dhibbanayaashu wuxuu ka kooban xafiisyo heegan oo ku yaal dalka oo dhan iyo xarun qaran iyo khadka telefoonka oo dadweynuhu lacag la'aan ku soo wici karo. Haddaad ku hadasho afafka iswiidhishka ama ingiriisiga waxaad wici kartaa telefoonka xafiiska gargaarka dhibbanayaasha, si aad su'aalo u weyddiiso ama u hesho warbixino ama aad ula xiriiri qofka ku sugan degaankaaga oo aad caawimaad u weyddiisato.

Xafiiska gargaarka dhibbanayaashu wuxuu caawimaad ku bixiyaa luuqado kala duwan. Booqo www.brottsofferjouren.se/spes si aad u ogaato inaan caawimaad kugu siin karno luuqaddaada. Waxaad kaloo naga soo wici kartaa telefoonka qaranka oo ah 0200-212019 oo lagu hadlo afafka iswiidhishka iyo ingiriiska.

Caawimaad qofka awooddiisa soo celineysa

Xafiiska gargaarka dhibbanayaashu wuxuu dadka siiyaa:

- Caawimaad bani-aadanimo oo dhegeysi iyo faham ku dhisan.
- Warbixin ku saabsan sida boliiska dacwad loogu gudbiyo, socodka dacwadda iyo arrimaha magdhawga.
- Caawimaad la xiriirta xukun maxkamadeed
- Caawimaad la xiriirka hay'adaha iyo shirkadaha caymiska

Waxaad ku siineynnaa caawimaad lacag la'aan ah oo lagu bixinayo afaf badan. U ma baahnid inaad dacwad u gudbisey boliiska.

Ka sii akhriso boggayaga internet:

www.brottsofferjouren.se/spes

BROTTSOFFER
JOUREN
0200-21 20 19